



Imtixaanka looga Qalin jebinayo Dugsiyada Sare ee California (CAHSEE)

Sharciga dawlad-goboleedka California wuxuu waajib ka dhigeyaa in dhammaan ardeyda dhigata dugsiyada guud ee California ay ku gudbaan Imtixaanka looga qalin jebinayo Dugsiyada Sare ee California, si shahaadada dugsiya sare loo guddoonsiiyo. Markii ugu horreysay waxaa loogu talagalay in lagu bilaabo ardeyda sannadka 2004 qalin jebinaysa. Hase ahaatee, bishii Luuliyo 2003 Guddiga Waxbarashadda Dawlad-goboleedka ayaa shuruudaas dib u dhigay ilaa iyo sannadka 2006 fasalka qalin jebin doona. Sharciga dawlad-goboleedka ayaa la ansaxiyey 1999 kaas oo (Qoddobka Sharciga Waxbarashadda tirsigiisu yahay 60850 iyo 60851) ee ahaa sameynta iyo hirgelinta imtixaanka loo yeqaano CAHSEE. Ujeeddada imtixaankaas waxaa weeyaan in dhammaan ardeyda ka qalinjebineysa dugsiyada sare la gaadhsiiyo heerka waxbarashadda ee dawlad-goboleedka u dejisan xaga Ingiriisiga/farshaxanada luuqada iyo xisaabta.

Ardeyda aan imtixaanka CAHSEE ku gudbin inta ay fasalka tobnaad ku jiraan waxay haystaan laba fursadood oo dheeraad ah oo ay imtixaanka dib ugu galan inta ay fasalka kow iyo tobnaad ku jiraan iyo saddex fursadood inta ay fasalka laba iyo tobnaad ku jiraan. Ardeydu waxay dib u galayaan qaybta ay ku gudbi waayeen oo keliya. Waxaa intaas weheliya, sharcigu wuxuu dusiyada degmooyinka shuruud kaga dhigeyaa inay waxbarasho dheeraad ah oo ku siman heerarka dawlad-goboleedka siiyaan ardeyda aan imtixaanka ku gudbin. Dugsiyada Magaalada San Diego (SDCS) waxay adeegyadaas ku bixiyaan fasalka caadiga ah dhexdiisa, marka dugsiya laga baxo kedib iyo waxbarashadda xilliga xagaaga la dhigto.

Waa maxay imtixaanada CAHSEE

Imtixaanka CAHSEE wuxuu ka kooban yahay laba qeybood: Farshaxanada Luuqada Ingiriisiga iyo xisaabta. Su'aasha muhimka ah waa tan ku taxaluqda heerarka waxbarashadda ee dawlad-goboleedka taas oo uu Madaxa Waxbarashadda Guud ee Dawlad-goboleedku uu magacaabay Guddiga Imtixaanka looga Qalin jebinayo Dugsiyada Sare ee California hubsadaan inay ardeydu yeqaanaan waxbarashadii dugsiya sare si ay u qalin jebiyaan. Qeybta farshaxanada Luuqada Ingiriisiga ee imtixaanka CAHSEE waxay soo bandhigeysaa heerarka waxbarashadda dawlad-goboleedka ilaa iyo fasalka 10aad. Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay su'aallo jawaabtooda la kala dooranayo iyo qoraal. Qeybta akhriska ee imtixaanku waa erayada, akhriska warbixinada, iyo akhriska suugaanta. Qeybta xisaabta ee waxay soo bandhigeysaa heerarka waxbarashadda dawlad-goboleedka fasalka 6aad ilaa iyo 8aad, waxaana ka mid ah nus ka mid ah Aljebra da sannadka-koowaad. Wuxuu ka kooban yahay su'aallo jawaabtooda la kala dooranayo oo ku saabsan tirooyinka, aljebra da iyo fan-saarka, cabbiraada iyo joometeriga, qiyaasta iyo tiro-koobka.

SOMALI VERSION: CAHSEE 04 – Somali200520061

Warbixinada kala Xidhiidh: Standards, Assessment, and Accountability: (619) 725-7166

Su'aalaha Warbaahinta : (619) 725-5578

www.sandi.net

La naqtiimay 09/21/2005

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 136,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 202 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 15,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta ee fasalada Xanaanada ilaa iyo 12aad. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.